# Golaha Wakiilada JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA, GUDIYADA IYO GOLAWAYNAHA

**Kal-fadhigii 37$^{aad}$ fadhigii 20$^{aad}$**

**12/08/2018**

**Quraanka: -** Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Xeerka Kalluumaysiga

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal waxaa inagu soo biiray Xildhibaan Cusub oo ah Saleebaan Diiriye Barre oo badalay marxuum AHN C/qaadir Askar iyadoo Mudanaha Cusub Maxkamadu soo dhaarisay. Waxaynu u balansanay dooda Xeerka Kalluumaysiga Badda markaa xoghayntu Xildhibaanada doodda doonaya ha qoraan.

**Md. Siciid Cilmi Rooble:-** Runtii maan joogin anigu, waana muhiim Xeerkan Gudoomiye waxa kaliye oo aan iminka sheegayaa intaan ka xasuusnahay, Magaalada Berbera kaluun nooc baa jiray reer berbera iyo dadka kaluumaysata ahi ka ganacsan jireen Wasaaradihii hore iyagoon ka fiirsan bay mamnuuceen nooca kaluunkaas oo ahaa kuwa kaliya laga inti-faacsan jiray ganacsiga, daraasad wayna lama samayn xiligaas dad badan baa markaa ganacsigii ka istaagay dabadeed waxaanu u tagnay Wasiirka Kaluumaysiga aniga iyo Xildhibaan Siciid Warsame baanu ahayn wuxuu nagu yidhi xeerkay sidaasi ku taalle dee badala Xeerka hadaad doontaan.

Sidaa darteed, waxaan soo jeedinayaa Xeerkaas hore ee la sameeyay noocyada Kaluunka lagu mamnuucay qaarkood laga ganacsado iyadoo daraasad fiican aan la samayn baa la mamnuucay, waana kaluunka laga sameeyo saliida ee la yidhaahdo INDHA-TOOSHLAHA, waana in la soo celiyaa sida Wasiirka hore sheegayna sidaas kuma tirtirmaayo wuuna is-dhalaa, marka anigu Qodobkaas ayaan soo jeedinayaaye ha la igu taaageero WSC.

**Md. Cabdi Maxamuud Jaamac:-** Anigu waxaan ka hadlayaa iminka Berbera ilaa Saylac horta waxaa lagu jiray 20 sano in laga kalluumaysto oo way xaalufiyeen, waxaan soo jeedinayaa marka in xoogaa laba ama saddex sano kayd (reserve) laga dhigo si ay u nasato oo u soo kabato wixii species ah ama kaluuna ee naadir ahaa.

Tan kale **Qodobka 19$^{aad}$** waxaa la yidhi 5 sanadood ha la siiyo Maraakiibta shisheeye, markaa shan sano way badan tahay waxaan soo jeedinayaa in saddex sano laga dhigo.

Waxa kale oo aan ku darayaa in Xeerkan aynu ku qorno awoodda illaalinta Maraakiibta aynu siinaa Ciidaamada badda oo ay masuul ka noqdaan

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** Xeerkan Waxay ila tahay waa mid hada loo baahan yahay waayo badu way dayacnayd oo waxaynu had iyo jeer maqli jirnay xata ugxantii iyo dhirtii ugxantu gali jirtay baa la burburiyay, Xeerkana intii aan ka arkayay wax badan buu ka reebayaa sida kaluunka la ogol yahay, ka la kaluumaysan karo, meelaha laga kaluumaysan karo iyo wax ajaanibka loo ogol yahay iyo wixii ka reeban oo specification badan buu sameeyay sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in Xeerkan la ansixiyo.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal:-** ASC, Gudoomiye sidaa la tilmaamay Xeerkani waa mid aad muhiim u ah, anigu waxaan ugu horeysiinayaa doodayda Wasaarad Kaluumaysi baa jiri-jirtay waxaana lagu daray Wasaaradii Kaluumaysiga tii xanaanada Xoolaha ismana qaban karaan labadaasi, markaa waxaan ku talinayaa in Wasaarada Kaluumaysiga halkeedii hore lagu soo celiyo (seconded 4 Xildhibaan).

Tan kale, waxa la sheegay kaluunku iskama dhasho ee si buu u dhashaa, waxaa jira dhagaxaan la yidhaahdo shacaabi (coral rives), shacaabigaas hadii la xaaqo abaarta ku dhacda bariga mid ka daran baa bada ku dhacda, waxaa loo baahan yahay kaluunka qaar baa sii dabar go'aya sida la sheego, kuwaas in la ilaaliyo xaq weeye, waxaana leeyahay ha la kantaroolo maraakiibtaas Wasaaradu inta badan leedayay way xaaqayaan oo ha la hubiyo shabaagta ay ku qaadayaan isla markaana kooto ha laga dhigo intay qaadan karaan oo aanay ka badin Karin.

Waxa kale oo jira Libaax baddeedka oo aduunka inta badan ka sii dhamaanaya inta la soo qabto madaxa ayaa qoorta laga goosta inta kalena la tuuraa, markaa kaasna ha la mamnuucaa. Intaasaan ku koobayaa, WSC.

**Marwo. Baar Siciid Faarax: -** ASC, anigu sida Xildhibaan Xaamud sheegay waxaan soo jeedinayaa in la soo celiyo Wasaaradii Kaluumaysiga sababtoo ah hore dhowr jeer baan arrinkaas uga hadlay Somaliland waxay lahayd Xoolo nool xoolihiina way dhinteen intii badnayd, markaa si badii looga faa'idaysto waa in Wasaaradii la soo celiyaa oo waliba la xoojiyaa iyadoo lagu jihaynayo dhaqaale iyo mashaariic farabadan dadka laga caawiyaa wixii ay ku kaluumaysan lahaayeen.

Sidoo kale waxaa jira Maraakiib ruqsado la siiyo oo waxay doonaan sameeya cid alaale iyo cid war u haysaana ma jirto xataa markii Wasaaradu jirtay sidii loo hubin jiray may ahayn si macquul, ruqsada la siiyay miisaan xadiddan bay ahayd iyana way buuxsan jireen markaakiibta, waxaa jirtay in maraakiib la soo qabtay oo Bebera la keenay oo rag

wanaagsan ay soo qabteen markay arkeen inay iska buuxsadeen, dabadeedna ninkii xafiiska joogay yidhi warqad buu haystaaye ha la sii daayo ragii daacad ahaa ee arrintaas ka shaqaynayay dabadeed moral jab ku dhacay, maraakiibtaas shisheeye anigu gabi ahaanba in la joojiyo ayaan soo jeedinayaa oo dawladu intay soo saarto kaluunka dabadeedna miisaan lagaga iibiyaa, waxaynu ognahay in dawlado dhami **khayraadkeenii** kumanaan warshadood ka sameysteen oo keenii dib inooga iibiyaan dibadana la inooga keeno isagoo qasacadaysan kii inaga la inaga kurtay, markaa Maraakiibtaas ha loo checkgareeyo si ka duwan sidii hore ama ha la joojiyo oo dawladu iyadu ha ka iibiso intay soo qabato.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in si fiican loo tayeeyo si ay gutaan waajibaadkooda oo khayraadka dalka ka baxaya digtooni badana uga qaataan, waana hambalyaynayaa Ciidanka badda oo si fiican u shaqeeya, waxayna ila tahay shaqo la'aanta Somaliland laga cabanayo halkii laga dabooli lahaa inay tahay Wasaarada Kaluumaysiga in la soo celiyo oo la tayayeeyay.

**Md. Ibraahim Mahdi Buubaa:-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Shaqaalaha, Saxaafadaba iyo martida kale ee Golaha joogta intaba waan salaamayaa, sida la wada sheegay Xeerkani waa xeerarkii Golaha la sugayay waxaana la sameeyay markii hore xeerkan 1995kii intii ka dambeysay wax dib u habeyn ama wax ka badal ahna laguma sameyn, wuxuuna ahaa Xeer aan wax badan ka tilmaamayn ka faa'idaysiga khayraadka badaha ee dihin kaas oo aduunyadu ku qiyaasto ama marka daraasaadka la sameeyo la soo saaro in Somaliland bulshadeedu 1% in ka yar ay ka faa'idaysato khayraadka bada ama wax ka soo galaan.

**S**idoo kale Xeerkaasi muu ahayn xeer ilaalinaya badda dheer ee Somaliland leedahay ama wax ka odhanaya kaluumaysiga foodadda ah ee badda ka socda, markaa in Xeerkan hada la keeno wax ka badal iyo dib u cusboonaysiin lagu sameeyo aad baan u soo dhowaynayaa waana taageersanahay.

Tan kale waxaynu la soconaa bulshada Somaliland oo intooda badan xoolo dhaqato ahayd ay abaaro kala dam-dambeeyay awgeed xoolihii ka dhamaadeen dadkii shaqo la'aan ay la taagan yihiin, Xeerkan wax laga badalay wuxuu ku dhiirigalinayaa xukuumada kuna waajibinayaa inay tababaro badan u sameyso bulshada gaar ahaan dhalinyarada shaqa la'aantu hayso lagu dhiirigaliyo sidii ay khayraadka badda ay uga faa'idaysan lahaayeena.

Dhanka kale, waxa jira Maraakiib shisheeye oo farabadan in badda lagu soo daayo ama badda Somaliland si sharci daro ah uga kaluumaysta oo xataa xeer ciqaabeedkii ay somaliya ka dhaxalnay ee penal code qodob lagu xisaabtamo kii lagu qabto bilaa sharci

isagoo uga kaluumaysanaya xataa muu jiri-jirin, kan laakiin maanta xeerkan ayaa u soo baxay isla markaana takhsiir cul-culus oo kala duduwan saaraya, sidoo kale waxaa jira maraakiib iyaga laftigoodu Somaliland cashuur yar oo qofkasto caqli lahi qaadi Karin in kaluun qiimihiisa lagu qiyaasay lix kun oo milyan oo dollar ayay xukuumadeheenii kala dambeeyay 20 kun dollar ka qaadan jireen, waana wax caqliga saliimka ah aanu qaadi Karin xeerkanina wuu badalayaa qodobadaas oo dhan.

Waxa kale oo jira sidoo kale maraakiib shisheeye oo intay kaluunka shabaag u xidhaan oo noocyada kaluunka oo dhan intay xaaqaan hadhowna intay u baahan yihiin ka qaata inta kale daadiya oo wasakheeya sharcigan ayaana wax ka odhanaya, waxa kale jira dhulkii uu kaluunku ku dhali jiray shacaabiga lahaa oo aan ka xasuusto meel ku dhow aaga Saylac iyo jaziiradahaas in shacaabigii kaluunku ku dhali jiray inta la qaaday ay maraakiib jaraafado sita xaaqeen sidoo kale Xeerkani arrintaas waxbuu ka qabanayaa.

**Sidaa daraadeed, Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Waxaan u arkaa Xeerkani inuu yahay mid Qaranku in badan u dhutinayay baahidiisana uu qabay, maantana mahad rabi tahay inuu Golihii Xeer-dejinta horyaal, waxaana u soo jeedinayaa in Xeerkani dood u baahnayn waayo Xeerkii hore ee 1995kii oo dhowr bayj ahaa iyo Xeerkani waa wax aad u kala fog waxaana baahan yahay deg-deg aynu u ansixino.
- Waxa kale oo aan ku gabogabaynayaa doodaydan Wasaaradaha Kaluumaysiga iyo Xanaanadda Xooluhu waa laba wasaaradood oo aad u waawayn, waxaana xukuumada u soo jeedinayaa in la kala saaro oo dib loo soo celiyo Wasaaradii Kaluumaysiga.

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise:-** Anigu Xeerkan intaan ka gaadhay baan gudagalayaa:- Qodobka 1[aad] ee Eray Bixinta halkaa Mudanyaashu way sheegeen in Wasaaradihii Xanaanadii Xooluhu iyo Kaluumaysigii way isasa saaran yihiin barito ka maalin in Wasaaradaha dib loo kala saarona way dhici kartaa wayna ku haboon tahay in la kala saaro, laakiin waxaynu u daynaynaa xukuumada, markaa waxaan soo jeedinayaa in Xeerkan Wasaaradii Kaluumaysiga meel looga sameeyo oo Erayada soo socda laga dhigo sidan:-

**"Wasaarada"** waxaa loola jeedaa Wasaarada qaabilsan Kaluumaysiga. **"Wasiir"** waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaarada qaabilsan Kaluumaysiga. **"Xeer-nidaamiye"** Waxaa loola jeedaa Xeer-hoosaadyo ka farcama Xeerkan. "**Markab kalluumeysi"** Waxaa loola jeedaa weelka maraakiibta ee loo isticmaalo kaluumeysiga, mid shisheeye iyo mid waddani intaba.

**"Kalluumeysi"** Waxaa loola jeedaa qabashada iyo dabashada kalluunka noocyada kale ee biyaha bada ku nool. **"Kaluumaysato"** Waxa loola jeedaa dadka ka xoogsada mihnada/xirfada kaluumaysiga. **"Ruqsad Kaluumaysi"** Waxaa loola jeedaa ogolaansho Kaluumaysi si Xeerka Waafaqsan **"Bii'ad (Deegaan)"** Waxaa loola jeedaa Biyaha badda iyo Noolaha ku jira oo dhan

Waxaa ka maqan Xeerkan **Kaluun** wuxuu yahay qaamuus ahaan oo maxaa loola jeedaa kaluunka aynu ka hadlayno markaa Xeerka kuma cada macnaha kaluun ee Xeerka ha lagu qeexo.

Waxan soo Jeedinayaa meelkasta oo ay ku qoran tahay Wasaarada Xanaanada Xoolaha iyo kaluumaysiga ha laga dhigo **Wasaaradda** oo kaliya.

**Qodobka 5aad Farqada 3aad** Waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo sidan **"Baarlamaanku waxay kormeer iyo Qiimayn ku yeelanayaan fulinta iyo ku dhaqanka xeerkan"**

**Qodobka 6aad Farqada 1aad** waxaan ka dhigay **"Kaluumaysatadu waxay door weyn ku leeyihiin hanaanka ka faaiideysiga kaluumaysiga iyo khayraadka badda si Xeerka Waafaqsan"**

**Qodobka 8aad Farqada 2aad** waxay u baahan tahay sixid markaa waxaan ku saxay "Lama Xaddidi karo noocyada ganacsiga kaluumaysiga badda Somaliland oo dihin awgeed sida ku qeexan.

Sidoo kale farqadaha ka hooseeya farqadaas ee Af-ingiriisiga ha laga dhigo Af-somali ama lifaaq Xeerka ha looga dhigo waayo Xeerka Af-somali.

Sidoo kale Kaluumadan la yidhi waa laga reebay kaluunka la kuluumaysan karo ee 10 nooc ah oo liis kuwada qoran oo Af-Ingriis ah somalidu mid kasta waxbay u yaqaaniine qolyaha Kaluumiga ha lagu celiyo oo iyagoo af-somali ah Xeerka ha lagu soo daro si loo garto kaluun kasta magaciisa somaliga waxaan soo jeedinayaa in la raadiyo.

**Qodobka 9aad Farqada 3aad** inta dambe ee ah si waafaqsan shuruucda Xeerka Ganacsiga Shirkadaha dalka waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **"si waafaqsana Xeerka Shirkadaha"**

**Qodobka 9aad ee** Guddida Qaranka ee la Talinta Arimaha Kaluumaysiga anigu waxaan ku soo koobay Gudidda 7 Xubnood oo kaliya iyagoo ah 9 xubnood waxaana ka saaray

labada xubnood ee Gudidda Golaha Wakiilada waayo hore ayay inoo soo mareene xeeerar noocaas oo kala ah si aanay muran u keenin Gudidda ha laga saaro inagu kormeer baynu leenahay Wasaaradaha ha loo daayo **(Farqada "H" ha laga saaro".**

**Farqada 4aad ee isla Qodobkan** waa ku qoran Guddidu waxay ku hawl geli doona xeerar ay dhigteen, marka halkaa Xeerar ay dhigteen waa **"Xeer-hoosaadyo qeexaya hawlahoodo oo ay soo saarto Wasaaradu"**

**Qodobka 11aad Farqada 2aad** waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo inta sharcigu ogolyahay ilayn cidkasta warbixin macluumaad lama siin karee.

**Qodobka 12aad Farqada 1aad** waxay u baahan tahay habeyn markaa sidan ayaan habeeyay sidan **"Wasaaradda ayaa qoraal ahaan ugu ogolaanaysaa cid kasta oo haysta rukhsad inuu sameeyo cilmi-baadhis la-xidhiidha kalluumaysiga iyo noolaha kale ee badda"**

**Farqada 1aad** ee isla Qodobkan sidoo kale waxay u baahan tahay dib u habayn markaa Iyana waxaa haboon sidan **"Waxa reeban ogolaansho la'aan ay ciddi ku sameeyo cilmi baadhis kaluumaysiga biyaha badda Somaliland"**
**Qodobka 13aad** waa sixid iyaduna waxay noqonaysaa **"Wasaaradu waxay Xeer-nidaamiye ku soo saaraysa goobaha seerayaasha kaydka badda Somaliland ee ka caagan kalumaysiga sida waafaqsan Xeerkan iyo shuruucda caalamiga**", inta dambe ee ka bilaabmaysa marka laga reebo maan fahmin markaa ha laga saaro ayaan soo jeedinayaa

**Md. Xuseen Axmed Caydiid:-** Shir-gudoonka iyo dhamaan xubnaha kale dhamaan waad salaamayntihiin, hadii aan ka bilaabo eray bixinta laba siyaabood ayaa eray bixinta loo sameeyaa oo mar macnaha erayga ayaa lagu sheegaa mana macnihii lagu soo gaabsanlahaa kalmadaa dheer ayaa lagu calaamadiyaa, marka ay wasaarad ama wasiir taagantahay dee isku macnayn mayno wax uu yahay lakiin wixii lagu soo gaabsan lahaa ayuu tilmaamayaa oo marka la leeyahay wasaarada xanaanada xoolaha iyo kaluumaysiga ee uu qoraalkeedu kugu dheeraanayo ayaa waxaa looga jeedaa meel kasta oo aad wasaarad ku aragto wasaarada xanaanada xoolaha iyo kaluumaysiga, Iyada oo eray bixinaha lagu qoray ayaa hadana waxaad arkaysaa xeerka dhexdiisa in sidii dheerayd loo qoray markaa waxaan odhan lahaa waa in aad Meesha ka saartaa hadii aad sida dheer ugu qorayso xeerka gudihiisa.

Eray bixinta waxaa lagu daray dhawr eray oo ah xadbiyood, biyaha Somaliland iyo dhul biyood erayadaasi marka aad body-ga ku is ticmaalayso hadana ma muujinayaan macnaha oo marka aad xaagaa iyo berbera u kacdo waa jira afar sur biyood ayaa

abuurma qaar waxaa la yidhaa internal waters oo base ka wax laga cabiro gudaha ayay ka soo xigaan oo 12-ka mayl ee ina soo xigana territorial water ayaa la yidhaa, 12-ka ku sii xigana contiguous zone 200 oo xeerbta ka cabirana economic exclusive zone baa layidhaa waana in aan afartaa uu aan magacyo u kala helo weeyi. Markay dhaqaale taagantahay hadii aanay jirin isna dal soo dirsanayaa 200 mayl wuu kuu fasaxayaa, markaa halkaa halagu cadeeyo xadbiyoodka dhaqaale oo uu economic exclusive zone ku turjumay ayaa hadana macnaha gudaha ku jiraa aanu muujinayn in uu yahay 200 oo mayl wixii uu kaaga saamoxo dalka kale ee kaasoo hor jeedaa intii uu kula qaybsan lahaa.

Tusaale ahaan **Qodobka 3aad** oo kale waxaa ku qoran xadbiyood oo ah (Xadka biyaha dalka Jamhuuriyada Somaliland wuxuu u qaybsanyahay laba qaybood) territorial water halka uu qodobka 7aad na odhanayo (dhul badeedka Somaliland) oo marna waa xad biyood marnaa waa dhul biyood hadana waxaa la yidhi xad biyood dhaqaale oo economic exclusive zone loola jeedo ayaan u malaynayaa markaa waa in wixii ay kala soocnaadaan ayaa haboon.

**Qodobka 7aad** oo u dhigan sidan (Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Kaluumaysiga iyo Ciidanka Ilaalada Xeebaha ayaa ka masuul ah ilaalinta amniga xeebaha Somaliland iyo ka hor tagga kaluumaysiga sharci darada biyaha dhul badeedka Somaliland) markaa xeebaha soomaliland waa ilaa halkee marka aad leedahay dhulbiyood waa 12mayl, markaa waxaan odhan lahaa ayaynaan isku soo koobin ee ilaa inta inoo dhaxaysa Yeman oo ka badan 12-ka mayl e aynu galno economic Exclusive Zone-ka oo hadii shidaal laga helo iyo hadii kaluun laga helaba cid kale oo qaadan kartaa ma jiree, waa in aan gaadhsiinaa xad badeedka oo aanu xeerku inaga lumin bad aan leenahay.

**Qodobka 10aad** farqadiisa oo u dhigan sidan (Guddidu waxay ku hawl geli doona xeerar ay dhigteen) waxaan odhan lahaa xeernidaamiye ka dheegma xeerka iyo xeer nidaamiye ay iyadu dajistaan oo shaqadooda iyo hawla hooda nidaamiya.

**Qodobka 12aad** (Wasaaraddu waxay qoraal ahaan ugu ogolaanaysaa qof kasta ama Markab kasta oo haysta rukhsad inuu cilmi-baadhis ku samayn karo kalluumaysiga iyo noolaha kale ee la xidhiidha khayraadka badda.) haduuna cilmi baadhis u socon miyaa la siinayaa waa in ay noqotaa cidii soo codsata ruqsadna haysta ayuubaan loo ogolaan karaa waayo waxay u dhigantahay hada markab kasta oo ruqsad haystaa wuu samayn karaa cilmi baadhis, waa in la cadeeyaa.

Meelo badan oo aan arkay erayaadaa aan halka hore ku soo sheegay ayaa soo noqnoqday oo waa in la saxaa, xaga Af-somalilagana waa in lagu noqdaa oo la saxaa. Waxa aanan kaga baxayaa **Qodobka 25aad** ee Tirtirida ah sida ay u qoran tahay oo ah (Xeerkani waxa uu tirtiray) waxaan is leeyahay malaha waxaa kaga haboon in uu xeerku hadlo oo la yidhaa halkan waxaa lagu tirtirayaa xeerkii caynkaa ahaa, inta danbana waxay ku haboontahay in la yidhaa waxaa kale oo la tirtiray qodob kasta oo xeer oo aan la jaan qaadayn xeerkan.

**Md. Cabdiqaadir X. Ismaaciil Jirde:-** aad iyo aad ayaan Gudoomiye kuugu mahadnaqayaa waxaan taageer sanahay mulaaxadaadkii ay soo jeediyeen mudanayaashii iga horeeyay Maxamed xuseen x. ciise, Guutaale, Xuseen Axmed Caydid, Buubaa iyo ragii kale ee iga horeeyayba, waxaa kale oo aad iyo aad u taageersanahay in la soo celiyo wasaaradii kaluumaysiga(secondment 6mudane ) maanta kaluumaysiga Dawladaha waaweyn ayaa ku tartama oo dagaal ayaa ka dhex dhici gaadhay Spain iyo England, Norway iyo England, Morocco iyo Spain. Wax dawlado ku dagaalamaan oo qaniimo ilaahay dhulka dhigay ayuu noqday oo maanta raadaal ayaa lagu ugaadhsadaa hadlka uu soo mari doono, waayo kaluunku wuu guuraa 30km oo dherer ah ama 20 km oo balaca socda ayuu satalaytku soo sheegayaa oo dalalka waa weyni waxaa layidhaa halkaa sii istaaga oo hor-cuna-qabateeya.

Inana waxaanu u baahanahay wasaarad aqoontaa iyo cilmigaa leh oo la xisaabtami karta, maadaama oo aynaan waxba la soo bixin la xisaabtanta dadkii wax la soo baxayay. Waana in wasaaradii la soo celiyaa lana tayeeyaa, mida kale ee wasaarada loo soo celinayaa sidaa xildhibaanadu ka dhawaajiyeen dadkeenii miyiga deganaa way ka imanayaan oo xoolihii baa ka baxay, mar hadii xooluhu bexeena waa in magaalooyinka ay u soo guuraan oo sida aan taariikhda ku hayno magaalo waxaa soo gala dadka caydhoobay dadkaana waxaa loo baahan yahay in meel lagu jeheeyo oo 1%ayaan ka faa’iidaysan karnaa khayraada badeena, markaa wasaarad hagu karta oo tababari karta dadka ayaa loo baahanyahay.

National plan oo wasaaradaha hawlaga guud, Wasaarada Deegaanka, Wasaarada kaluumaysiga oo dadkii xeebaha la dajiyo taasina waxay u baahan tahay wasaarad xoogan oo miisaniyad wanaagsan leh caalamkana looga doono dhaqaale wasaaradana waa in dib loo sameeyaa.

Intii ay saaxiibaday ka hadleen dib ugu noqon maayo lakiin xuduudaha bada midi waa territorial Water, midna waa continental shelf oo dhulkaagii is raacsanaa inta uu bada

galaayo oo hada ruushku waakan ku dacwiyay Antarctic waa continental shelf-kayagii ama waa dhulkayagii boqolaal kilo mitir ayay u jirataa dhulkiisana, markaa territorial waterka meelahaa bariga waxaa laga yaabaa in dhulku go'an yahay oo aanu lahayn dhul bada raacsan, laakiin galbeedka waa laga heli karaa, waxaa kale oo jira 200 oo nautical may ah oo kaluun oo kaliya maahee khayraad kale ka soo bixi karo oo aad adigu leedahay, waa hadii ay kuu gaadho oo dalalka aad jaarka tihiin kaa qaataan oo wey hayaan ciidanka ilaada xeebaha iyo qolada kaluumaysigubee waa in la qeexaa maxaa terotorial water ah halkee ayaan continent shelf ku leenahay iyo exclusive economic Zone oo wixii kkayraad eek u jira ee ku jira aad u ilaashato.

Hadii 200 oo nuyuutical mayl aad gaadho waxaa la yidhaa bloue water oo Nave mooyaane cid kale oo kuu difaaci kartaa ma jiro waana in la qorshaystaa in la sameeyo Nave oo 200 ee mayl cost Gard kuma fila xasaradaa ka dhaca had iyo jeed oo ninkii kaa xoog rooni wuu kaa qaadayaa waana intaa qorshaha lagu darsado ayaan soo jeedinayaa.

**Qodobka 12aad** cilmi baadhis ayaa la sheegay oo la yidhi wasaaradu waxay bixinaysaa ruqsad cilmi baadhiseed oo cilimi baadhista cid kale ayaa samaysanaysa oo dawladahaa waaweyni waxay leeyihiin maraakiin badaha u wareega, markaa waxaan leeyahay waa in inagu aan ugu horaynaa wixii soo baxa ee ayna u la tagin UN-ka iyo macaahidoodii waa in Meesha lagu cadeeyaa. Waxaana halkan inoogu taala cilmi baadhis badan oo la sameeyay oo halkan inoogu taala waana in la helaa iyada oo dhamaystiran.

Waxaa kale oo aan ka hadayaa amniga xeebaha iyo kaluumaysiga waxaynu ku koobnay ciidanka ilaalada Xeebaha waana in laga sii tabaabulshaysta hadii la gaadhayo Economic Zone kaas, halkan qodobaa ku jira odhanaya controlka iyo baadhista kormeerka waxaa uu siinayaa ama uu qorayaa sida isku-duwayaasha gobolada isku-duwayaasha Gobolada ee wasaarada oo kormeeraya baadhis joogto ahna kusamayn kara gaadiidka ku hawlan kaluumaysiga muxuu awood hayaa isku duwaha gobolku ee kaluumaysigu muxuu hayaa, xataa sidii qodobkii hore aan ku soo siinay ilaalada xeebaha maynaan siin, markaa waa in lagu daraa oo la yidhaa sida isku-duwayaasha Gobolada iyo Ciidanka Ilaalada Xeebaha waa in kaligii aan lagu koobin. Xeerkani waa xeer muhiim ah markaa waxaan soo jeedin lahaa in mulaaxadaadkaa oo dhan lagu daro xeerka, sidoo kale waxaan taageerayaa in xeerkan la ansixiyo oo uu inaga baxo wasalaamu calaykum.

**Md. Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim shir gudoonka xildhibaanada sharafta leh, guddida iyo dhamaan qolyaha ka soo shaqeeyayba waan salaamayaa, sidii hore loo sheegay waxaan ta'kiidinayaa oo aan taageersanahay in

wasaaradii kaluumaysiga la soo celiyo sidaa uu xildhibaan Cabdiqaadir faah-faahiyay waa in jiilasha soo socda loo sii go-gol dhigaa si ay uga faa'iidaystaan oo hadii ay aqoon noqoto iyo qorshaba waa in aan galnaa oo sida ay maanta u dayacantahay aynaan ku eegin, in wasaarada loo soo celiyo oo ay kobacdo oo aan la tuur-tuurina waa muhiim.

Xeerkani waa xeer technical ah ka xildhibaano ahaana cid ku takhasustayna ma jirto, marka aan wixii aqoon badan loo lahayna wax badan ayaa laga bood boodayaa ama lag ail-duufi karaa, iska daa xildhibaanada e dalka inta ku takhasustay kaluumaysiga ayaa iska yar, markii ay wasaarada kaluumaysigu jirtay waxaa jiray nin shil baabuur ku dhintay ayaa ugu danbeeyay alle ha u naxariistee isga ayaa kala hadli karayay shir kadahaa maanta, taasina waxay ku tusaysaa sida aan ugu aradanahay aqoontii kaluunka, mar hadii ay aqoontii yartahayna dhaawac ayay la imanaysaa.

Meelo badan oo aan xeerka eegay waxyaabo badan oo xaga danbe kaga lifaaqnaan lahaa ama ma-baa'dii noqon lahaa ayaa ku jira oo aad moodo in aanu la jaan qaadayn xeerka.

**Qodobka 9aad** oo su'aal laga keenay waxaa ku qoran noocyada kaluumaysiga hadana farqadiisa koobaad waxaa ku qoran noocyada kaluumaysiga waxay u kala baxaan laba nooc oo kala ah. Markaa halkaa sare waxaan ku dari lahaa noocyada ganacsiga kaluumaysiga waa in ay gashaa. Marka aynu xeerkan oo kale samaynayno waxaa haboon in laba qaab loo shaqeeyo oo wadamada ina la jaarka ah ee aan madaqad wadaagno xeerar kaluumaysi ayay leeyihiine aan soo qaadano oo aynu waafajino dalkeena ayaa ila fiicnaan lahayd.

Intaa ay soomaliland jirtay waxaa jira niman wakiilo ah oo u jooga dalka dalal kale waxaana loo baahanyahay in xeerkeenani uu dadkaa jeheeyo aynanu ku soo darno xeerka qodobka labaad kabaniga wadaniga ah ee xidhiidh ama heshiis la galay kanbani shisheeye kuwaana sharci gaara oo ka duwan kii wakiilka in ay halka ku cadaato weeyaan iyo shirkada shisheeye ee aan wakiilna lahayn waa in Iyana aan sharciga aan ku cadaynaa qodobadaas oo dhami waxay u baahanyihiin lagu fasiro xeerkan.

**Qodobka 13aad** Goobaha Seerayaasha Kaydka Badda, innaga oo aan wax badan ka garanayn seero baddeedka sida uu u sheqeeyo iyo xadiga uu leegyahay, markaa hadii aynaan fahansanayn miyaynu xeer u samayn karnaa waayo khabiirkii waxan inoo sharixi lahaana aanu inala joogin oo tusaale ahaan markaan halkaa marayay waan ku wareeray. Markaa qodobkaasi sida uu u goranyahay waa in lagu noqdaa ayaan odhan lahaa, waxaa kale oo aan odhan lahaa qaladaad madbaci ah ayaa ku badane waa in la saxaa.

Waxaa kale oo ku jira bixinta ruqsadaha waxaa isku dhex jira shariikadihii wadaniga ahaa iyo kuwii caalamiga ahaa, markaa waxaan odhan lahaa waa in qodabada aanu ku dhex daadsanaane waa in cutub gooniya laga dhigaa sida shirkadahaa loola macaamilayo oo ay ku cadaataa sida loola macaamilayo shirkadahaa shisheeye ee ayna ku dhex jirin shirkadeheena.

Shirkadaheena wadaniga ahna waa iyagana cutub gaar ah laaga waramaa ama lugu qoraan sida hada mudanayaashi horaba sheegeen in ii yahay muhiim kaluunku maadaama oo xoolihii inaga bexeen bada ayaa la iskugu tagayaa waxaanan u baahanahay in aan xeer isku muquujino oo iskuuladii bada waa in sharci laga dhigaa in la sameeyo oo hada jaamacada ku taal berbera qaabka ay u habaysan tahay maaha qaab looga faa'iidaysanayo bada qaab kale ayay u faruur xidhan tahay, waxaa kale oo aynu u baahanay is kuulo oo caruurteena ka baxda dugsiyada dhexe meel ay iskuul sare ahaan u gasho ayaynu u baahanahay.

Waxaa kale oo loo baahanyahay in uu xeerkani abuuro iskuulo ay wax ku bartaan dadkeena soo caydhoobay ee ay xoolihi ka bexeen, waxaa kale oo loo baahan yahay qalabka yar sida shabaagta iyo culaafaha in cashuur dhaaf lagu keeno ayaa loo baahanyahay oo Matalan anigu hadii aan u baahdo kaluumay waa in aan helaa wax aan bada la galo oo aan ku tuuri karo, waxyaabaha kareeban ka luumaysigana waa in meel la iskugu geeyaa ayaan odhan lahaa. Waxaan leeyahay halaa waxyaabo badan oo ay ahayd in ay cilmi baadhista ka muuqdaan xaga danbe ayaa xaga hore ku qoran iyo waxyaabo mabda'aahna ah oo ku jiro oo la qodobeeyay kuwaana waa in la saxaa.

**Gudoomiyaha: -** Dooddii way dhamaatay, waxaanan guddida, la taliyaha iyo xuseen axmed Caydiid aan farayaa in ay isku soo guraan xeerka meelaha laga badaley, barina waxaa la keenayaa xeerka Ciidanka Ilaada xeebaha Jamhuuriyada Somaliland, fadhiguna wuu xidhan yahay.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ---------------------------------- | ------------------------------------ |